



Aan ka dhigno Oregon meel qof kasta u wanaagsan.

Daafaha gobalkeena, dadka badan oo ku dhaqan Oregon ayaa waajahaaya caqabado hortaagan caafimaadka wanaagsan. Xeerarka dawlada ee la xariira isir nacaybka iyo takoorka ayaa sidaas ka dhigay ilaa bulshooyin badan waajahaan caqabado ku gudban caafimaadka. Caqabadahaan ayaa sidoo kale ku jira u qalmida waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka; shaqooyinkeena; xaafada aan dagan nahay; xataa meelaha aan u Aadno nasiinada ayaa saamayntu ku dhacday. Haddana caafimaadka dadka Oregon ayaa kobac samayn doona keliya marka nidaamyada kaladuwaa ee gobalku ay si toos ah iskugu waafaqaan xumaanta caqabadahaan.

**Healthier Together Oregon
(HTO, Barnaamijka Wadajirka
Caafimaadka ee Oregon) ayaa ah
qorshaha Oregon ee 2020–2024
si kor loogu qaado sinaanta
caafimaadka gobalka.**

HT waa Qorshaheena Hormarinta Caafimaadka Gobalka kaasoo aqoonsanaaya 5 muhiimadood oo kuwa caafimaadka ah iyo 62 xeeladoo oo kor loogu qaadaayo caafimaadka dhammaan dadka reer Oregon. Qof kasta ama koox kasta oo u taagan kor u qaadista caafimaadka bulshada ayaa adeegsan karta.



Healthier Together Oregon

healthiertogetheroregon.org

Waa mashruuc ay fulinayso

Oregon Health Authority

(Maamulka Caafimaadka ee Oregon)



Bulshooyinka wada shaqaynaaya ayaa samayn kara isbadal.

Kor u qaadista codadka iyo xoojinta hal adayga bulshooyinka Oregon ayaa abuuri doonta hormaro guul ka keenaaya higsigeena: gobal caafimaadka iyo faya dhawrka laga guul gaaro dhammaan heerarka nolosha ee dadka dhammaan isirada, qoomiyadaha, naafooyinka, jinsiyada, dookhyada galmada, xaalada dhaqan dhaqaale, wadanka qofku kasoo jeedo iyo goobaa uu dagan yahay.

Waxaan samaynaa dadaal wadareed.

Oregon Health Authority (Maamulka Caafimaadka Oregon) ayaa bixinaaya taageerada ugu wayn ee qorshaha asagoo kala shaqaynaaya iskaashato iyo isbahaysiyo kaladuwan:

- Daryeelka caafimaadka
- Saraakiisha la doorto
- Shirkadaha loo shaqeeyo
- Deeq bixiyaasha
- Gaadiidka
- Adeegsiga dhulka iyo qorshaynta
- Caafimaadka gobalka, qabiilkha iyo deegaanka ee dadwaynaha
- Cadaalada danbiyada iyo sharci fulinta
- Ururada u adeeggaa bulshada
- Ururada diinta
- Adeeg bixiyaasha guryaha iyo dadka
- Waxbarashadda

Waxaan caawin karnaa urur kasta ama bulsho ka shaqaynaysa kor u qaadista caafimaadka dadka Oregon.

Qorshaha waxaa loogu talagalay in:

- Xog looga baxsho qorsheyaasha hormarinta caafimaadka ee ay dhaqan gelisay waaxda caafimaadka dadwaynaha ee maxaliga ah, Ururada Daryeelka Abaabulan iyo isbitaallada khayriga ah
- Waxay xog ku biirisaa xeerarka, iskaashiyada iyo maalgeshiyada
- Waxay fursad siisaa in laga wada shaqeeyo higsiga caafimaadka wadaaga ah
- Waxay fursad siisaa wada shaqaynta iyo isku xirnaanta dhammaan gobalka si loo daraaseeyo waxa shaqaynaaya si loo hormariyo sinnaanta

Inkastoo OHA ay isku dubaridayso taageerada mashruuca HTP, gudi ka socda bulshada oo loo yaqaano PartnerSHIP ayaa sameeya kormeer, hagid, dhaqan iyo gaarista go'aanka. Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah oo ku saabsan PartnerSHIP, booqo healthoregon.org/ship.

Waxaan doonaynaa inaan xariir la samayno barnaamijyada kale si aan u hormarino caafimaadka Oregon.

Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah ama si aad noolasoo xariirto, booqo healthiertogetheroregon.org ama iimeel u dir publichealth.policy@state.or.us. Waxaan sugaynaa inaad nagusoo war celiso. Daawo muuqaalkeena YouTube: <https://bit.ly/3JvkuAE>